# Leenka cusub E ee METRO

## *Jidka 6 ayaa dhawaan yeelan doona gaadiid dheereeya*

METRO E Line waa leen Bus Rapid Transit (BRT) kaas ku bixin doona gaadiid degdeg ah oo la isku halayn karo marinka Jidka 6. Adeegga BRT waa xirmada horumarinta gaadiidka oo ku kordhinaya safar degdeg ah iyo waayo-aragnimo horumarsan oo ku saabsan waddooyinka basaska ee ugu mashquulka badan Metro Transit.


In ka badan 8,000 oo raacis ah ayaa lagu sameeyay Jidka 6 maalin kasta oo shaqo ah sanadkii 2019. Raacitaanka waddada 6 ayaa weli sii ahaaneyso mid xoogan, xitaa inta lagu jiro cudurka safmarka ah.

METRO E Line wuxuu ku safri doonaa 4th Street iyo University Avenue, isagoo sii dhex mari doona Bartamaha magaalada Minneapolis iyo Uptown ee Hennepin Avenue ilaa Southdale Transit Center ee Edina isagoona sii maraya 44th Street iyo France Avenue.

### *Safar dhakhsa badan*

Hadafka Leenka E waa in laga dhigo adeega mid ka dhakhsa badan ku dhawaad 20%. Waa kan sida:

- Basasku u yareeyaan joogsigooda, iyagoo si weyn u dedejiya wakhtiga safarka.
- Mashiinnada tigidhada ee yaala boosteejooyinka ay ugu oggolaadaan macaamiisha inay iibsadaan tigidhada ka hor intaysan la fuulin gaarig lacag caddaan ah ama kaarka kiridhitka.
- Basaska sagxadoodu gaaban tahay iyo jid gooyaha dhaadheer ee ku yaala boosteejooyinka, iyo albaabada baska ee ballaaran iyo ka soo fuulida qaybta hore iyo qaybta danbe, u dedejiyaan fuulitaanka.
- Kor u qaadida jid gooyada booteejada ay u beekhaamuso wakhtiga; basaska waxay si fudud u gali karaan wadada ka dib markay ku adeegaan boosteejo.
- Mudnaanta calaamadda iyo jidadka baska kaliya u gaarka ah ee meelaha muhiimka ah ay u oggolaadaan basaska inaysan istaagin.




***Ka eeg khariidad faahfaahsan barta metrotransit.org/e-line-project***


**XIRIIRKA MASHRUUCA:**
Erik Thompson
ELine@metrotransit.org


Metro Transit

metrotransit.org/e-line-project


11-07-671118-24

## ***Jadwalka Mashruuca*** *(waa la beddeli karaa)*

| • 2018-2019 | • 2020-2022 | • 2022-2023 | • 2024-2025 | • 2025 |
|---|---|---|---|---|
| DARAASADDA MARINKA | QORSHAYNTA | INJINEERNIMO | DHISMO | U FURAN ADEEG |

# *Waxa laga filan karo dhismaha*

Metro Transit waxay uga mahadcelinaysaa dadka deegaanka, ganacsatada iyo macaamiisha inay dulqaad muujiyaan inta shaqaaluhu ay ka shaqaynayaan sidii ay Leenka E ay ugu diyaarin lahaayeen in la furo. Inta lagu jiro dhismaha, waxaa jiri kara waqtiyo ay waddooyinka xiran yihiin oo ay tahay inaad marto waddooyin kala duwan, waxaa laga yaabaa in qaybo ka mid ah meelaha ay dadka ku lugeeyaan in la xiro, waxaana dhici karta in mararka qaarkood ay dhacaan dhawaaqyo cod dheer ah. Dadku waa inay saadaaliyaan saamaynadan soo socda:

- Marka aan ka shaqeyno boosteeja kasta oo ay wadooyinku ku kulmaan, waxaan inta badan ku dari doonaa qaybo cusub wadada iyo qaybta dadka ku lugeeyaan. Waxaan sidoo kale wax ka beddeli doonaa nalalka taraafigga waxaana dhisi doonaa hoy iyo alaab cusub.
- Goobaha qaar waxa kale oo ku jiri doona shaqada tasiilaadka iyo hagaajinta meelaha ay dadka ku lugeeyaaan ama meelaha lagu wado baaskiilka.
- Shaqaaluhu waxay gelin doonaan tuubooyinka dhulka hoostiisa si ay u sameeyaan dariiq loogu talagalay xiriir internet oo gaar ah. Dariiqan ayaa isku xiri doona dhammaan tignoolajiyada cajiibka ah ee boosteejooyinka tareenka iyo inuu ku jiro jidka.
- Si loo hagaajiyo xawaaraha gaadiidka iyo isku halaynta, leemanka baska kaliya ayaa laga hirgelin doonaa qaybo ka mid ah Hennepin Avenue taasoo qayb ka ah mashaariicda waddooyinka oo ay hogaaminayaan hay'adaha wadashaqaynta kala dhaxaysa.
- Qaar ka mid ah xaruumaha Leenka E waxaa lagu dhisi doonaa isuduwidda mashaariicda waddooyinka oo ay hogaaminayaan hay'adaha wadashaqaynta kala dhaxaysa. Isgaadhsiinta ku saabsan saamaynta dhismaha iyo wakhtiga lagu qabanayo shaqadan waxa bixin doona wakaalada hogaanka ah.
- Had iyo jeer waxaanu u oggolaan doonaa ugu yaraan hal dhinac oo ka mid ah goobta dhismaha inay dadka ku lugeeyaan.
- Waxaa loo oggolaan doonaa inay dadka u maraan guryahooda iyo ganacsiyadooda.
- Inta lagu jiro dhismaha, basasku waxay u baahan doonaan inay maraan wadooyin kala duwan. Macluumaadka cusub waxaa laga heli karaa barta metrotransit.org/alerts. Rukumo digniinada Rakaabka si aad si fudud ula socoto isbeddelka dariiqa baska iyo meelaha joogsiyada ku meel gaadhka ah.

### *Ahoow xog ogaal*

**Wixii ku saabsan macluumaad guud ee mashruuca:**
metrotransit.org/e-line-project

**Si aad u hesho tafaasiisha akhbaaraad ku saabsan isbeddelada ku yimaadda jidada baska:**
iska qor Digniinada loo soo diro Rakaabka barta metrotransit.org/alerts

**Macluumaadkii ugu dambeeyay ee ku saabsan dhismaha:**
iska qor akhbaaraadka Leen E ee layskugu soo diro iimaylka

### *Nala soo xiriir haddii aad qabtid wax su'aalo ama walaac ah*

**Khadka lagala xiriiro qolada dhismaha:**
651-524-6050

**Iimaylka wacyigelinta:**
ELine@metrotransit.org

**Ma u baahan tahay turjubaan?**
Español, Hmoob, Soomaali, Oromoo, Karen

- Naga soo wac 612-373-3333, Dooro Xulashada 2
- Sheeg luuqada:
Af Español, Af Hmoob, Af Soomaali, Af Oromo, Af Karen

METRO
E Line